

TALOOPYIN LOOGU TALAGALAY ISWAREYSIGA WAALIDIINTA IYO MACALLIMIINTA

Iswareysiga waalidiinta iyo macallimiinta sannadkiiba, labo ama saddex mar ayaa dabayaaqada semistar kasta la qabtaa, (term), oo marka kaararka warbixiinada guryaha loo diro. Waana fursado ay waalidiinta iyo macallimiintu si wada jir ah uga hadlayaan, sidii ay ilmo walba ku caawin lahaayeen guusha dugsigooda. Waana wakhti aad u kooban, badanaaba waa 10 illa iyo 15 daqiiqo. Waxa aad mihiim u ah, kulanka iswareysiga ka hor, in aad is diyaarisaan, si looga fa' deysato wakhtigaas aad u kooban. Haddii aad wakhti dheeraad ah u baahantihiin, waxaad qorsheysaan ballan kale.

1. QORSHEEYA

Kaarka warbixinta ilmaha soo akhriya. Siina qorta waxa ku saabsan su'aalihiina iyo dareenkiinba. Warbixinta wixii ku saabsanna ilmahiina kala sheekeysta. Waxaad doonaysaan in aad macallimiinta weydiisaan, qoraal taxane ah diyaarsada.

2. SU'AALO WEYDIYA

Wakhti ku imaada. Taxanihiina su'aalaha la imaada. Macallimiintu waxay idin kala hadli doonaan kararka warbixinada ilmahiina ama idin tusi doonaan qeybo tusaalooyin ah oo hawlaha wiilkiina ama gabadhiina. Macallinka/da u sheega waxay ilmahiinu arrimaha dugsiga ka daneynayaan ama ayna jecleyn. Macallinka/da la socodsiiya haddi shaqada ama waajibaadka gurigu ay ku badanyihiin ama ku yaryihiin. Kulanka iswareysiga waalidiinta iyo macallimiintu waa kuwu sir ah. Macallimiinta la wadaaga arrimaha idiin gaarka ah oo saameynaya ilmahiina horumakooda ama akhlaaqdooda ee dugsiga. (Tsle: Xanuunada / jirrada qoyska, shaqo raadinta, iwm). Xogwarrankiinuna wuxuu macallimiinta ku kaalmeynayaa inay ilmahiin si dhab ah u fahmaan.

- Muxuu ilmahaygu ku fiican yahay?
- Waa maxay khibradaha wali ay u baahanyihiin (isagu ama iyadu) inay horumar ku gaaraan?
- Ilmahaygu kaalmo dheerada ah miyuu helaa?
- Muxuu yahay nidaamkiina shaqada gurigu, ama waajibaadka? Wakhti intee in le'eg ayuu ilmahaygu u baahanyahay inuu waajibaadka guriga ugu guddto?
- Sideebu ilmahaygu ardeyda kale ula dhaqmaa?
- Sideebaan ilmahayga guriga ugu caawin karaan?
- Waa maxay qaabka ugu wanaagsan ee aan idin kula xiriiri karayo, haddii aan su'aalo qabo?

Qodobada kulantida iswareysiga wax ka sii qorta, si aad uga wada xaajootaan idinka iyo ilmahiina.

3. AMBA QAAD – (KA DABA TAGA)

Ka wada hadla arrimaha ugu wanaagsan ee macallimiinta ay ka sheegeen isku buugsanaata ilmahiina. Ka hadla sida idinka iyo macallimku aad ilmahiina uga cawin laheydeen arrimaha u baahan in la daryeelo.